

Waxaa waqtigan xaadirka ah la xidhay Barnaamijka Qaybta 8^{aad} ee liiska sugayaasha ee Wakaaladda Guriynta ee Dagaanka King. Waqtigan la joogo ma jiraan codsiyo la qaybinayo.

Haddii aad codsi soo xereysatay intii u dhaxaysay **May 23 illaa June 7, 2007** waxaa khasab ah in ay ku soo gaadhay warqad lagugula socodsiinayo in aad ka mid tahay 2500 ee qof ee la soo geliyay liiskayaga sugayaasha iyo in kale oo laguna siiyay lambarka bakhtiyaa nasiibka, haddii lagu soo geliyay liiska sugayaasha. Haddii ayna wax warqad ahi ku soo gaadhin, fadlan xafiiska Qaybta 8^{aad} kala soo xidhiidh taleefonka (206) 214-1300.

Waqtigan xaadirka ah tirada ugu horeeysa ee liiska sugayaashu waa 2000, bil-welbana waxaanu caawinnaa illaa 50 codsadayaal. Marka uu magacaagu soo gaadho qaybta horaysa ee liiska sugayaasha, Wakaaladda Guriyeynta ayaa arrintaa kula-socodsiin doonta. Fadlan waxaad xusuusnaataa in aad qoraal kula socodsiisid wixii isbeddel ah ee xagga ciwaankaaga ah xafiiska Qaybta 8^{aad} ee ku yaalla: 15455 65th Avenue South, Tukwila, WA, 98188.

Waxaa xogtan dib loo cusboonaysiiyay 06/02/08. Fadlan waxaad bil-welba la soco xogta dib loo cusboonaysiiyay.